## WARQADA KA RAALI AHAANSHAHA IYO MACLUUMAADKA EE WAALID/XANNAANEEYE/ MASUUL KA

### Xog raadinta Dugsiga ee Aragtida Ardaygu uu ka qabo Dugsiga 2024

Gacaliye Waalid / Xannaaneeye / Masuul

Warqadani waxay kugu wargelinaysaa wax ku saabsan Xog raadinta Dugsiga ee sida Ardaygu u arako 2024 (AtoSS), oo lagu maamuli doono dhammaan arday dugsiga dawlada ee Fasalada 4 aad ilaa 12 aad.

### Ku saabsan xog raadinta

AtoSS waa xog raadinta ardayda sannadlaha ah oo ikhtiyaari ah ee Wasaaradda Waxbarashada si ay u caawiso dugsiyada iyo wasaaradu inay ka helaan fahamka ardaydu si day u arkaan dugsiga iyo waayo aragnimadooda. Waxaan qiimeynaa codka ardayda oo ah sidii aan ku hagaajin lahayn hawlgalka ardayga, fayo qabka iyo tilmaamaha tayada leh waxaana weydiin doonaa ilmahaaga wax ku saabsan fekerkooda iyo dareenkooda la xiriira dugsigooda, waxbarashadooda, xiriirka dugsigooda, u adkeysiga, xoog u sheegashada, fayo qabka iyo caafimaadka, nashaadka jireed, iyo nolosha guud ahaan.

ORIMA Research Pty Ltd ayey qandaraas la gashay wasaaradu si ay u maamusho xog raadinta online ka ah waxayna siin doonaan taageero dugsiyada ilaa iyo intuu ka socdo sahanku iyagoo adeegsanaha iimeyl iyo khadka taleefanka.

Sannadkan, dugsigaagu wuxuu sameyn doonaa xog raadinta oo laga bilaabayo 6th May until 14th June.

### Waa maxay faa'iidooyinka?

Dadka dhalinyarada ahi way ka helaan inay fekerkooda dhiibtaan! Xograadintu waxay socotey wax u dhow 20 sannadood qiimo ayuuna u leeayahay xagga caawinta dugsiyadu sidii ay u fahmi lahaayeen aragtida ardayga si ay u qorsheeyaan barnaamijyada iyo nashaadka lagu hagaajinayo waayo aragnimada ilmahaaga ee dugsigiisa. Jawaabaha xograadinta waxay sidoo kale caawinayaan Wasaaradda Waxbarashada inay fahamto sida loo sii hagaajin karo ardeyda khibradooda waxbarasho.

### Waa maxay khataraha?

Anagoo aan ka malaynayn khataro badan oo ka qaybgalka, ardayda qaarkood waxaa laga yaabaa inay u qaataan su'aalaha wax shakhsi ah oo xaalad ahaan xasaasi ah. Haddii aad ogolaato in ilmahaagu ka qaybqaato, weli way u furan yihiin inay ka boodaan su'aalaha ama ay ka noqdaan marxalad kasta haddii xog ururintu ka xanaajiso ama aan lagu qanacsanayn. Macalin ayaa la joogi doona intuu socdo sahanku si uu u taageero ardayda.

Su'aalaha waxaa laga soo doortay qalabyada xog ururinta saxda ah ee laga isticmaalay Australia iyo dunidda, waa kuwo ku saleysan-awood, waxaana loogu talagalay kooxda fasal sanaddeed walba.

### Maxaa ilmahayga laga codsan doonaa inuu sameeyo?

Cunugaaga waxaa lagu casuumi doonaa inuu ku buuxiyo xog ururinta **online-ka inta lagu jiro waqtiga fasalka** iyada oo la isticmaalayo ujeedo ku dhisan qalabka xog ururinta online-ka oo ammaan ah. Waxaa muhiim ah in la ogaado inaanan sinnaba "u imtixaaneynin" ilmahaaga. Fadlan ogow:

- Ka qaybgalka ardayda ee xog ururinta waa mid ikhtiyaari ah ardayduna way ka noqon karaan markay doonaan.
- Xog ururinta waxaa lagu heli karaa siyaalo kala duwan si loogu suurtageliyo in dhammaan ardaydu ka qaybgalaan.
- Xog ururinta waxay qaadan doontaa 20-45 daqiiiqo si loo dhamaystiro.

## Sidee looga taxadari karaa sirta canugeyga?

Ilmahaaga waxaa la siin doonaa login u gaar ah oo uu ku dhammaystiro xog ururinta macalinka. Login ka ardayga waa wax lagu garto oo la siiyey oo ay isticmaali doonto wasaaradu inay isku xirto macluumaadka oo ujeedkiisu yahay oo kaliya baaritaan iyo cilmi baaris. Macluumaadka lagu garanayo, sida ardayga magaciisa ama nambarka Ardayga ee Victoria (VSN) loo **ma** isticmaali doono isku xirka qaybaha macluumaadka. Ardayda qaarkood Macluumaadkooda dadka (tus. Fasalka, jinsiga, da'da, ahaanshaha Aboorijinaal iyo/ama heerka Torres Strait Islander) waxaa lagala soo baxayaa diiwaanka maamuleed ee ay wasaaradu haysso waxaana lagu xirayaa Aqoonsiga (ID) ardayga intay socoto xog raadinta hagaajinta shaqadeeda si ay u taageerto maamulka xog raadinta.

ORIMA Research waxaa loo isticmaali doonaa oo kaliya ujeedooyin cilmi baariseed si ay u sahasho ururinta macluumaadka iyo maamulka Xog raadinta Dugsiga sida loo arko. Si loo hubiyo qarsoonaanta jawaabaha ilmahaaga waa la ilaalinayaa wakhti kasta, macluumaadka shakhsi ahaan lagu aqoonsanayo laguma diiwaangelin doono galka jawaabta xog raadinta ee ay ORIMA Research siiso wasaarada. Dhammaan macluumaadka waxaa lagu keydinayaa kaydad ku yaal Australia helitaankiisana waxaa lagu xaddiday shaqaalaha ka shaqaynaya mashruuca.

Dhamaan macluumaadka la soo ururiyey ee ku saabsan ilmahaaga waxaa loo maamuli doonaa sida waafaqsan *Xeerka 2014 ee Ilaalinta Macluumaadka Gaar ka ah* (Vic), *Xeerka Diiwaanka Caafimaadka ee 2001* (Vic) iyo *Xeerka Diiwaanka Dadweynaha ee 1973* (Vic), iyo sidoo kale Wasaarada Qorshaha Gaarka ah ee Dugsiyada. Fadlan ogow sida waafaqsan sharciga kore iyo qorshaheena, waxaa jirta marar in sharcigu naga rabo inaan macluumaadka ilmahaagu bixiyey aan la wadaagno cid. Tusaale, markii ay jirto wax cabsigelin ku ah amaanka iyo caafimaadka ilmahaaga.

## Sidee loo soo sheegi doonaa natiijooyinka?

Macluumaadka xog raadinta ee gobolka oo dhan oo laysu geeyey ayaa la isticmaali doonaa si looga warbixiyo qorshayaasha bilowga ah waxaana sidoo kale loo isticmaalayaa wada hadalka dadweynaha ee arimaha la xiriira hawlgalka ardayda iyo fayo qabka. Tusaalaha sidii mar hore loo isticmaalay macluumaadka waxaa ku jiray ka warbixinta heerarka hawlgalka ardayga ee Soo-koobitaanka Waxqabadkiisa ee Warbixin Sannadeedka ee Bulshada Dugsiga.

Natiijada xog raadinta waxaa sidoo kale loo dib loogu warbixin doonaa dugsiga iyadoo ah qaab iskuwadar ah ilaa iyo xiliga xograadinta oo dhan. Macluumaadka ama natiijooyinka ku saabsan arday khaas ah lalama wadaagi doono dugsiga. Macluumaadka dhamaan xog raadinta waxaa lagu heli karaa warbixino ah kooxo arday ah kaliya si aan arday gaar ahaaneed loo aqoonsan. Meesha tirada ardaydu ay hooseyso, macluumaadka hoose ayaa loo dhigayaa si aan dugsigu u arag natiijada kooxdaas.

Waxaa laga yaabaa inuu dugsigaagu la wadaago natiijada sahanka waalidiinta iyo xannaaneeyaha.

## Ikhtiyaarrada ka qeybgalka

Ka qeybgalista xog raadintu waa **ikhriyaari**. Haddii adigu **aadan** la jeclayn ilmahaaga inuu sameeyo xog raadinta, fadlan ka bax adoo iimayl u soo diraya dugsigaaga: Hume.central.sc@education.vic.gov.au or phone 9066 3600 ka hor intaysan xog raadintu bilaaban 13th May 2024.

Macluumaadka shakhsiyeed ee ardayga waxaa lala wadaagayaa ORIMA Research si loo fududeeyo diyaargaraynta xog raadinta ka hor ka bixida nidaamkan. Haddii aad doorato inuu ilmahaagu ka baxo ka qayb qaadashada, ka dib dugsigaagu wuxuu hubin doonaa inaan ilmahaaga la siin gelitaanka xog raadinta. Faahfaahinta ardayga waxaa tirtiri doona ORIMA Research marka la gabagabeeyo xog raadinta.

Haddii dugsigaagu uusan helin iimyel ka Diiditaanka ka Raali ahaanshaha ka hor taariikhda bilowga xog raadinta, ee sida kore, micnaheedu wuxuu noqonayaa in ka raali ahaanshaha in ilmahaagu ka qayb galo Xog raadinta Aragtida Dugsiga ee 2024**.**

Wixii macluumaad dheeraad ah ee ku saabsan xog raadinta, oo ay ku jiraan su'aalaha ilmahaaga la weydiin doono inuu ka jawaabo, fadlan booqo wasaarada boggeeda macluumaadka xog raadinta.

Haddii aad jeclaan lahayd macluumaad dheeraad ah, fadlan la hadal macalinka ilmahaaga, ama la xiriir wasaaradda school.surveys@education.vic.gov.au.

Mahadsanid,

Wasaaradda Waxbarashada, Victoria